IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريــدة الرسميــة

Sannadka 14aad Muqdisho, 28ka Maajo 1986 L. 2 R 5

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar walba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 13 ee 27 Abr. 1986, Shirkadha Ganacsiga Dhoofinta Xoolaha. Bog; 396

SHARCI L. 14 ee 27 Abr. Oggolaansho Meelmarin Heshiis Iskaashi oo ku dhinacyada Dhaqanka, C/ga iyo Far/da. » 399

SHARCI L. 15 ee 3 Maajo 1986, Oggolaansho Heshiis Dhaqan oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Jabuuti. » 400

SHARCI L. 16 ee 3 Maajo 1986, Oggolaansho Meelmarin Heshiis Dhaqan Isaashi xagga Teknikaad ee dhinaca Kalluunka oo dhex/ray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Jabuuti. » 401

SHARCI L. 17 ee 3 Maajo 1986, Oggolaansho Meelmarin Heshiis Amaaheed dhex maray Sanduuqa Horumarinta Afrika iyo B.H. Soomaaliyeed. » 402

## QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 14 ee 27 Abr. 1986, Meel-marin Heshiis Iskaashi oo ku saabsan dhinacyada Dhaqanka » 403

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 15 ee 3 Maajo 1986, Meel-marin heshiiska dhaqan oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Jabuuti. » 404

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٥ بتاريخ ٣ مايو ١٩٨٦
التصديق على الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال
وحكومة جمهورية جيبوتي في المجالات الثقافية والاعلامية

٤٠٥

X ER MADADXWEYNAHA JDS, L. 16 ee 3 Maajo 1986, Meel-marin heshiis Iskaashi xagga Teknikada ee dhinaca Kalluunka. 406 «

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٦ بتاريخ ٣ مايو ١٩٨٦
التصديق على اتفاقية حول التعاون التقني في مجال صيد
الاسماك بين حكومة ج.ص.د. وحكومة جيبوتي ٤٠٧

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 taa Heriikh 3da Maajo 86, Meel-marin Heshiis amaaheed oo dhexmaray S.H. Afrika iyo Bangiga H. Soomaaliyeed. » 408

Decree no. 17, of 3 May 86: Instrument of Ratification. » 408/bis

XEER WASAARADDA WARSHADAHA, IYO GANACSIGA, L. 4 ee 4 Maajo 86, Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Sh/ha Ganacsiga Xoolaha Nool. » 409

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.5.86, Lumid Jeeg War. L. 0241363 ku qoran Cali Xaashi Maxamed L. 223 » 411

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.5.86, Lumdi Jeeg War. L. 021044 ku qoran Maxamed Xaaji Xabiibulaah L. 224 » 412

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.5.86, Lumid Afar (4) Jeeg War. Lam. 70978-71087-71088-71089 ku qoran Nuur Cis maan Maxamed L. 225 » 413

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.5.86, Lumid Laba (2) Jeeg War. L. 707894 iyo 707893 ku qoran Cabdicasiis Sheekh Axmed L. 226 » 414

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.5.86, Lumid 6 Jeeg War. ku qoran Ramla Yuusuf Maxamed L. 227 » 415

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.5.86, Lumid 3 Jeeg War. L. 0150078-0150151-0150079 ku qoran Ramla Yuusuf Maxamed L. 228 » 416

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.3.86, Lumid Buug Kayd L. 2896 ku qoran Hindi Axmed Ismaaciil L. 229 » 417

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 8.2.86, Lumid Jeeg War. L. 0156123 ku qoran Maxamed Muxumed Boon L. 230 » 418

## S A X I D — Q A L A D

FAAFINTA RASMIGA AH EE LAM. 1 R 4 ee 24 Abriile 86, Bog. 296 iyo 297, Jeegagga Wareega ee lam. yihiin 0507361 iyo 636961, waa in loo cusbooneysiiyaa lana siiyaa lacagta ku kala qoran J.le Cilmi Cabdulle Yuusuf.

## QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

Sharci lambar 13, taariikh [illegible] 1986; Shirkadaha Ganacsiga Dhoofka Xoolaha.

### MADAXWEYNAHA JDS

MAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

#### Qod. 1aad

Laga bilaabo/maalinta 9aad ee dhaqangalka Sharcigan, xoolaha nool ee Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa lagu dhoofin karaa magac shirkadeed oo keliya.

#### Qod. 2aad

1. Ganacsatada xoolo-dhoofsatadu waxay sameysanayaan shirkado iyadoo shirkad waliba xubnaheedu ay ka koobnaanayaan ugu yarayn 30 qof.

2. Shiraduhu waxay noqon karaan nooca adeegga ama kuwo ganacsiga xoolaha iyo adeegyada la xiriira wada qabta.

#### Qod. 3aad

Shirkad waliba waxay la baxeysaa magac u gaar ah iyadoo saldhiggeeda ka furan karta meeshii ay ka doonto magaalooyinka waaweyn ee Dalka oo isgaarsiin ta leh, laamo iyo furuucna waxay ku yeelan kartaa Dalka gudihiisa iyo dibeddiisa, gaar ahaa Waddammada xiriirka ganacsi ay la leedahay.

#### Qod. 4aad

Marka Shirkaddu ay tahay adeeg wadaag keliya, xubin kastaa oo shirkadda ka mid ah waxay keensaney saa qaybta ay ku leedahay xoolaha warqadda kalsoonida loo soo furay (L/C), hantida ka timaaddana toos ayaa loo siinayaa.

Qod. 5aad

Shirkad kasta oo dhismeysa waa in xubnaha ay ka kooban tahay mid waliba ku darsado lacag dhan Sh.So. 50.000 (kontonkun) ugu yaraan oo saldhig u noqota aasaaska Shiradda iyo hawl socodsiinteeda.

Qod. 6aad

Shirkaduhu xoolaha waxay ku dhoofin karaan habka warqadda kalsoonida (L/C) oo keliya.

Qod. 7aad

Shirkaduhu waxay xoolaha ka dhoofin karaan oo keliya furdooyinka habeysan.

Qod. 8aad

Shirkad kasta waxay xaq u leedahay in ay xoolaha u dhoofiso meel allaale meeshii ay suuq uga heleyso haddii aannu Sharcigu diideyn.

Qod. 9aad

Xoolaha dheddigga ah, nooc kasta ha ahaadeene, Dalka lagama dhoofin karo.

Qod. 10aad

Dhismaha Sharikadaha waxaa loo marayaa habka ku tilmaaman Sharciga Dalka u degsan ee nidaamiya dhismaha Sharikadaha ganacsiga, hase yeeshee:

a) Inta aan la dhisin shirkad, waa in Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga iyo Rugta Ganacsiga loo soo gudbiyaa nuqul ah heshiiska dhismaha Shirkadda iyo nidaamkeeda asaasiga ah (Statuto);

b) Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsigu waxay xaq u leedahay in ay tilmaan ka bixiso qoraalladaas iyadoo ku duweysa danta caamka ah.

Qod. 11aad

Shirkadaha xoolaha dhoofiya waxay yeelanayaan Guddi Sare oo ka kooban Guddoomiyayaasha Shirkadaha.

Qod. 12aad

Guddiga qodobka sare ku tilmaaman waxaa Guddoomiye u noqonaya Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga, ku-xigeenna waxaa u noqonaya Xubin ay soo doortaan Xubnaha Guddigu.

Qod. 13aad

Guddiga Sare wuxuu dejinayaa siyaasadda ganacsiga xoolaha, suuq u raadinta, suuq geynta, qiimo u goynta, ilaalinta tartanka, caafimaadka xoolaha iyo tayadoodaba wuxuuna had iyo jeer arrimahaas kala tashanayaa Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga iyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

Qod. 14aad

Guddiga Sare waa in uu ugu yaraan lixdii biloodba mar shiro si uu uga baaraan dego arrimaha ku tilmaaman Qodobka 13aad ee Sharcigan.

Qod. 15aad

Shirkadaha iyo Ganacsatada xoolaha dhoofiya waa in ay isku habeeyaan ku dhaqanka Sharcigan iyo sidii ay u midoobi lahaayeen.

Qod. 16aad

Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga, isagoo la tashanaaya Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye dhammeystiraya Sharcigan.

Qod. 17aad

Waxaa la tirtiray sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 18aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Qof kasta waxaa waajib ku ah in uu dhowro.

Muqdisho, 27 Abr. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 14, taariikh 27 Abr. 1986: Oggolaansho meelmarin Heshiis Iskaashi oo ku saabsan dhinacyada Dhaqanka, cilmiga iyo farsamada oo dhexmaray JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Fransiiska.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga so socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska Iskaashi oo ku saabsan dhinacyada dhaqanka, cilmiga iyo farsamada oo dhexmaray JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Fransiiska.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho ee Dalka Soomaaliya taariikhdu markay ahayd 12.3.1986.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 27 Abr. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 15, taariikh 3 Maajo 1986: Oggolaansho meelmarin Heshiis Dhaqan oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuiryadda Jabuuti.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti, kuna saab san iskaashiga xagga dhaqanka, warfaafinta, sayniska iyo Isboortiga.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Jabuuti ee Dalka Jamhuuriyadda Jabuuti taariikhdu markey ahayd 22 Jennaayo 1986.

3. Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 May 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 16, taariikh 3 Maajo 1986: Oggolaansho meelmarin Heshiis Iskaashi xagga Teknikada dhi naca kalluunka oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiis Iskaashi xagga teknikada ee dhinaca kalluumeysiga oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Jabuuti ee Dalka Jamhuuriyadda Jabuuti taariikhdu markey ahayd 22.1.1986.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3 May 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sharci lambar 17, taariikh 3 Maajo 1986: Oggolaansho meelmarin Heshiis amaaheed oo dhexmaray Sanduuqa Horumarinta Afrika iyo Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiis amaaheed oo dhexmaray Sanduuqa Horumarinta Afrika iyo Bankiga Horumarinta Soomaalyieed, amaahdaas oo dhan M.X. 12.000.000.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Abidjaan ee Dalka Ivory Coast taariikhdu markey ahayd 18.11.1985.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3 May 1986

## QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 14 ee 27 Abr. 1986: Meel-marin heshiiska iskaashi oo ku saabsan dhinacyada Dhaqaalaha, Cilmiga iyo Farsamada oo oo dhexmaray JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Faransiiska.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 67aad, faqradda 5aad iyo qodobka 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dasauurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 14 ee 27.4.1986 oo Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday heshiiska ujeeddada ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska iskaashi oo ku saabsan dhinacyada dhaqanka, cilmiga iyo farsamada oo dhexmaray JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Faransiiska, oo lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho ee Dalka Soomaaliya, taariikhdu markay ahayd 12.3.86.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka JDS ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 27 Abr. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 15 ee 3 Maa o 1986:
Meel-marin heshiiska dhaqan oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 67aad, faqradda 5aad iyo qodobka 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Das-auurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 15 ee 3.5.1986, oo Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday heshiiska ujeeddada ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska dhaqan oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti, oo lagu kala saxiixday Magaalada Jabuuti ee Dalka Jabuuti, taariikhdu markay ahayd 22ka Jennaayo 1986.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka JDS ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.
Muqdisho, 3 Maajo 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٥ بتاريـــخ ٣مايــو ١٩٨٦.
التصديق على الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطيـة وحكومة جمهورية جيبوتي في المجالات الثقافية والاعلامية والرياضة.

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ الفقرة الرابعـــة مـــن المـــادة ٨٢ مـــن الدستـــور

وعلـى القانون رقم ٩ لعام ١٩٨٤ بشأن تعديل الدستور.

وعلى القانون رقم ١٥ بتاريخ والذي بموجبه وافق مجلس الشعـب على الاتفاقية المبينـة في هـــذا المرسوم..

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية .

يرســـم

بما هو آت :

المادة الاولـــى

تم التصديق على الاتفاقية المبرمة بتاريخ ٢٢ ـــ ١ ـــ ١٩٨٦ في مدينـــة جيبوتي بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جمهوريـــة جيبوتي بشـــأن اقامـــه وتطويـــر التعـــاون بـــين المؤسســـات الثقافيـــة والاعلامية والرياضية والعلمية ..

المادة الثانيـــة

تكون للاتفاقية قوة انقانون في نطاق جمهورية الصومال الديمقراطية.

المادة الثالثـــة

يسري هذا المرسوم ابتداء من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية وينشر في الجريدة الرسمية للجمهوريـــة ..

مقديشو . في ٣ مايو ١٩٨٦

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

ـــ محمـــد سياد بـــري

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 16 ee 3 Maajo 1986: Meel-marinta heshiiska Iskaashi xagga Teknikada ee dhinaca Kalluunka oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo qodobka 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 16 ee 3.5.1986 oo Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday heshiiska ujeeddada ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska Iskaashika xagga Teknikada ee dhinaca Kalluunka oo dhexmaray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo lagu kala saxiixday Magaalada Jabuuti ee Dalka aJbuuti, taariikhdu markay ahayd 22.1.1986.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka JDS ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 3 May 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٦ بتاريخ ٣ مايو ١٩٨٦
التصديق على اتفاقية حول التعاون التقنى فى مجال صيد الاسماك
بين حكومة ج.ص.د. وحكومة جيبوتى

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور ..

وعلى القانون رقم ٤٩ لعام ١٩٨٤ بشأن تعديل الدستور.

وعلى القانون رقم ١٦ بتاريخ ٣ مايو ١٩٨٦ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المبينة فى هذا المرسوم.

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية .

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية وحكومة جيبوتى بتاريخ ٢٣ - ١ - ١٩٨٦ فى مدينة جيبوتى الخاصة بالتعاون التقنى فى مجال صيد الاسماك.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية.

المادة الثالثة

يسرى هذا المرسوم ابتداء من تاريخ التوقيع عليه من قبل رئيس الجمهورية وينشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية
مقديشو . فى ٣ مايو ١٩٨٦

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية
ـ محمد سياد برى

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 taariikh 3 Maajo 86: Meel-marin Heshiiska amaaheed oo dhexmaray Sanduuqa Horumarinta Afrika iyo Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed.-

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 17 ee 3da Maajo 86 oo Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday heshiiska ujeeddada ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYAY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskan la meel-mariyo;

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska amaaheed oo dhexmaray Sanduuqa Horumarinta Afrika iyo Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed, oo lagu kala saxiixday magaalada Abidjaan ee Dalka Ivory Coast, taariikhdu markay ahayd 18.11.1985.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka JDS ku yeelanayaa astaan Sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 3 May 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 17 of 3 May 86: Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 84;

HAVING SEEN: The Law no. 17 of 3.5.86, on the base of which the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article I

The Line Agreement Credit between the African Development Fund and The Somali Development Bank for financing the foreign exchange cost of a programme of assistance to small scale farmes, small and medium scale fishermen, and their cooperatives societies in Somalia, signed in ABIDJAN (Ivory Coast) on 18 Novembar 1985, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have a force of law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published on Official Bulletin of the State.-

Mogadishu, 3 May 1986

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER WASARADDA WARSHADASA IYO GANACSIGA L. 4 ee 4 Maajo 1986: Xeer-Nidaamiyana dhismaha Shirkadaha Ganacsiga Xoolaha Nool.

WASIIRKA WASAARADDA WAR. IYO GANACSIGA

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. yahay 13 ee soo baxay 27.4.86 kuna saabsan Dhismaha Shirkadaha Ganacsiga Xoolaha;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. yahay 12 ee soo baxay 26.9.1964;

MARKUU OGAADAY: Lagama maarmaan-nimada in Sharciga Shirkadaha Ganacsiga Xoolaha loo sameeyo Xeer-nidaamiye.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

1. Laga bilaabo dhaqan galka sharciga Lr. yahay 13 ee soo baxay 27.4.86, muddo saddex bilood (3) ah waa in Ganacsatadu ku sameystaan Shirkado Xoolaha nool dhoofiya.

2. Marka ay dhammaato muddada ku xusan faqradda Koowaad ee Qodobkaan Xoolaha nool ee J.D.S., waxaa lagu dhoofin karaa Magac Shirkadeed oo kaliya.

3. Shirkadaah Dhismaha shaqadoodu waxay noqoneysaa, Naaxin, Suuq-raadin iyo dhoofin Xoolaha nool.

Qod. 2aad

1. Waa inay jiraan ugu yaraan Soddon (30) Xubnood oo diyaar u ah ka qeyb qaadashada Dhismaha Shirkad-waliba, iyadoo xubin kasta raa'sumaalka Shirkadda ku yeelaneyso ugu yaraan Shs. 50.000/=.

2. In Dhismaha Shirkadda ka hor raa'sumaalka Shirkadda 3/10 la geeyo ama la dhigo Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

3. In Xeerka Shirkadda oo ay wada saxiixeen Aasaasayaasha iyo «Notaio» oo uu ku lifaaqan yahay Resiid muujinaya Lacagta la dhigay Bankiga Dhexe la keeno Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga (Qeybta Ga-

nacsiga) si loogu gudbiyo Maxkamadda Gobolka oo diiwaan gelin doonta.

4. Lacagta Shirkadda Bankiga Dhexe ka taal oo ah 3/10 raa'sumaalka Shirkadda, waxay lasoo noqon karaan marka Maxkamadda Gobolka Dhismaha Shirkadda laga diiwaan geliyo.

Qod. 3aad

1. Sida ku cad Qodobka 11,12,13 iyo 14aad ee Sharciga Lr. yahay 13, soona baxay 27.4.86, Shirkaduhu waxay yeelanayaan Guddi Sare oo Lixdii (6. biloodba mar Shira, waxaana la qaban karaa Shirarkaas marka ay kasoo qeyb galaan 2/3 Xubnaha Guddiga.

2. Guddiga Sare wuxuu yeelan karaa Shirar aan caadi ahayn, haddii ay jiraan duruufo kalifaya, waxaana isugu yeeri kara Guddoomiyaha ama haddii ay codsadaan ugu yaraan Boqolkiiba Toban (10%) xubnaha Guddiga.

Qod. 4aad

1. Haddii laba Shirkadood isku Magac noqoto, waxaa Magacaas loo tixgelinayaa Shirkadda ku horeysa Diiwaan gelinta.

2. Marka Shirkadda la diiwaan geliyo waa in Nuqulo ka mid ah Xeerkeeda la kala geeyo Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga iyo Rugta Ganacsiga.

Qod. 5aad

— Shirkaddii ku xadgudubta Nidaamka Ganacsiga Dalka sida: dhoofin Xoolo dhedig ah, Kontrobaan, Xoolo Caafimaadkoodu xun yahay ama Tayadoodu hooseyso, waxaa marka ugu horeysa la ganaaxi doonaa Shs. 500.000/=, haddii mar labaad Shirkaddaasi u noqoto falal noocaas ah, waxaa laga qaaid doonaa Shatiga ay ku Ganacsato.

Qod. 6aad

Shirkad-waliba waa in ay sameysato Hab Xisaabeed isla markaana waa in ay leedahay Guddi Maamul

iyo mid Hantidhawr si ay Sanadkasta dhammaadkiisa xisaab xir u sameeyaan.

Qod. 7aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa Maalinta la saxiixo, waxaana lagu soo qorayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Maajo 1986

Waan araguay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga L. 39
Muqdsiho, 11 Maajo 1986
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

WASIIRKA WASAARADDA WAR. IYO GANACSIGA
(S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xaaji Xabiibulah;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeegga Wareega L. 021044 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/weyne kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Maxamed Xaaji Xabiibulah sida ku cad warqadda Lam. 4573 tr. 6.5.86 kana soo baxday Bang'ga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Lam. 021044 lagana sameeyey Laanta B/weyne ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Maxamed Xaaji Xabiibulah.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta B/weyne ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Maxamed Xaaji Xabiibulah lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 ee ku qornayd Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 1g maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.5.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 223

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

— QAYBTA MADANIGA —

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Maxamed Axmed;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeegga Wareega L. 0241563 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag siga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000/= kuna qoran magaca Cali 17.6.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Xaashi Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 49104 tr. Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lam. 0241363 lagana sameeyey Laanta Burco ee Bangiga Gadhan Sh.So. 30.000/= kuna qoran magaca Cali Xaashi Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cabdi Maxamed Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.5.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 224

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalel Nuur Cismaan Maxamed;

HADDUU TIXGELIYAY: In ay dhumeen Jeegagga Wareega Lam. kala yihiin 70978-71087-71088-71089 laga na sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Saddexaad kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= isugeyn 400.000/= kuna qoran magaca Nuur Cismaan Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 0344 tr. 19.5.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanat Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega Lam. kala yihiin 70978-71087-71088-71089 lagana sameeyey Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= isugeyn 400.000/= kuna qoran magaca Nuur Cismaan Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo mid la mid ah Jeegagga Wareega ee kor ku qoran ninka la yiraahdo Nuur Cismaan Maxamed lacagta ku kala qoranna ay tahay midkiiba 100.000/= isugeyn 400.000/= markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu daabaco faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.5.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 225

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### — QAYBTA MADANIGA —

### GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdicasiis Sh. Axmed;

HADDUU ARKAY: In ay dhumeen Laba Jeeg Wareega L. kala yihiin 707894—707895 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 10.000/ iyo Sh.So. 20.000/= isugeyn 30.000/= kuna qoran magaca Cabdicasiis Sheekh Axmed sida ku cad warqadda Lam. 2513 tr. 14.5.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1952.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi iyo (Ammortamento) Labada Jeeg ee Lam. kala yihiin 707894-707893 lagana sameeyey Laanta Labaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku kala jirto lacag dhan Sh.So. 10.000/= iyo 20.000/= isugeyn 30.000/= kuna qoran magaca Cabdicasiis Sheekh Axmed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Labaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo J.le Sabdicasiis Sheekh Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 30.000=/ ee ku kala qornayd Labada Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga soo bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.5.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 226

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjigaaiu soo qoray Jaalle Ramla Yuusuf Maxamed;

HADDUU TIXGELIYAY: in ay dhumeen 6 Jeeg Wareega Lam. kala yihiin 0222040-0222041-0222042-0222045-0222047-0222048 lagana wada sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000 isugeyn 600.000/= kuna qoran magaca Ramla Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 5138 tr. 20.5.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lam. kala yihiin 0222040-0222041-0222042-0222045-0222047-0222048 lagana wada sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo ayna ku kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= isugeyn 600.000/= kuna qoran magaca Ramla Yuusuf Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Ceerigaabo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Ramla Yuusuf Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 600.000/= oo ku kala qoran Jeegagga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.5.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 227

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Ramla Yuusuf Maxamed;

HADDUU TIXGELIYAY: In ay dhumeen 3 Jeeg Wareega Lam. kala yihiin 0150078-0150151-0150079 laga-na wada sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Laanta Berbera kuna kala jirto lacag dhan Laba ah min Sh.So. 50.000/= iyo mid 40.000/= isugeyn 140.000/= kuna qoran magaca Ramla Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 5138 tr. 20.5.1986 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY:Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lam. kala yihiin 0150078-0150151-0150079 lagana wada sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Laanta Berbera ayna ku kala jirto lacag dhan Laba Jeeg ee hore midkiiba Sh.So. 50.000/= kan Saddexaadna Sh.So. 40.000/= isugeyn 140.000=/ kuna qoran magaca Ramla Yuusuf Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Berbera ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Ramla Yuusuf Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 140.000/= ee ku kala qoran Saddexda Jeeg ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maamlood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.5.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 228

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay uu lambarkiisu ahaa 2896 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanat Shanaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 97.202.97 uu iska lahaa Hindi Axmed Ismaaciil sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0188 taariikhdeeduna tahay 10.3.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.62.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 2896 ee ku qoran Hindi Axmed Ismaaciil ayna ku jirto Sh.So 97.202.97/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Shanaad u bedesho Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maailnta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.3.1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 229

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/7/86. Taariikhda 8.2.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Muxumed Boon kuna taariikheysan 4.2.86, uuna ku Codsanaayo in loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee lumay lambarkiisu hoos ku qoran yahay;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa lambarkeedu yahay 0172 ee taariikhdeedu tahay 6.2.86, laguna soo Caddeeyey in laga sameeyey Jeeggaas Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa, loona sameeyey Jeegaas Maxamed Muxumed Boon, lacagtiisuna dhan tahay 50,000/= Shillin, loona sameeyey taariikhdu markay ahayd 16.5.85;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1962kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

in la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay Lambarkiisu yahay 0156123 ee taariikhdiisu tahay 16.5.85 Jeegaasna uu ku qoran yahay Lacagtiisana uu iska leeyahay Maxamed Muxumed Boon, Cusbooneysiintana gacanta laga saaro Jaaliahaas magaciisa aan soo sheegay ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta go'aanka laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Laanta Madaxtooyada J:D.S.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in lagu dhejiyo Nuqulka Go'aanka Bangiga irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA M. G. W/GALBEED HARGEYSA
(Ibraahin Faarax Maaxmed)

L. 230

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega ee Lam. 537224.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee Lumay;

HADDUUU ARKAY: Ogeysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco ee tr. 13.10.86;

HADDUU ARKAY: Qod. 69-70) Lumida Jeegga Wareega ee Lam: 537224 ee ku qoran Jaalle Xuseen Yuusuf Warsame lagana sameeyey Laanta Burco tr. 30.8:85 kuna jirtay Sh.So. 18.000/= kana lumay Jaalle Xuseen Yuusuf Warsame;

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo Cusbooneysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan Jaalle Xuseen Yuusuf Warsame marka ay ka soo wareegto 20 casho gudahood laguna shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In JeeggaCusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Xuseen Yuusuf Warsame iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan;

BURCO, 13.3.1986

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO
(Dr. Abuukar Islow Cumar)

KAALIYAHA MAX. G. TOGDHEER
(Cali Faarax Jaamac)

KAALIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO

MGT/69/86 Tr. 24.5.86

UJ: Baafin Jeegga Wareega ee Lam .80382.

GARSOORAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Codsiga uu soo qortay Ciise Cabdillaahi Jaamac ee ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee lumay Tr. 24.5.86;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco ee ku taariikheysan 20.5.86ka;

HADDUU ARKAY: Qod. 69-65) lumid Jeegga Wareega lam. yahay 80382 ee Sh.So. 100.000/ kuna qornaa Yaasiin Cabdi Cigaal lagana sameeyey L. Burco, 15.5.86

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan J.le Ciise Cabdillaahi Jaamac marka ay ka soo wareegto 20 casho gudahood laguna shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaor J.le Ciise Cabdillaahi Jaamac iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

GARSOORAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO
(Maxamed Xaaji Cabdiqaadir)

KAALIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO
(Jaamac Cabdillaahi Bille)

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

MGT/60/86 BURCO, 28.4.86

UJ:- Baafin Jeegga Wareega ee Lam. 0152856 ee lumay.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO-

HADDUU ARKAY: Codsiga uu soo qortay Axmed Cali Nuur ee Tr. 28.4.86 ee ku saabsanaa Baafin Jeegga Wareega ee lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco ee Tr. 26.4.86;

HADDUU ARKAY:- Qod. 69-65) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. 0152856 ee ay ku jirtay Sh.So. 50.000/ lagana sameeyey L. Berbera Tr. 13.4.86 kuna qoran Axmed Cali Nuur.

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusboonaysiiyo Jeeggaas kor ku xusan J.le Axmed Cali Nuur markii ay ka soo wareegto 20 casho laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaro J.le Axmed Cali Nuur iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

(Jaamac Cabdillaahi Bille)
MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO